DILEY RIDGE
MEDICAL CENTER

Caawimaada Maaliyadeed iyo Siyaasada Daryeelka Samafalka

Ruuxda hawl galkayaga si loogu adeego ruuxka sidii ku wa naxiriis leh iyo beddelka joogitaanka daawaynta gudaha bulshaddayada, Nidaamka Caafimaadka Diley Ridge waxaa ka go'an bixinta adeegyada daryeelka caafimaad ee dhammaan bukaanka ku salaysan baahida caafimaad.

Bukaanada u baahan caawimada maaliyadeed ama kuwa la kulma dhibaato maaliyadeed oo ku meel gaadh ah, Nidaamka Caafimaadka Diley Ridge waxay bixisaa dhowr caawimo iyo ikhtiyaarada lacag bixinta, ay ka mid tahay deeqda iyo daryeelka lacagta la dhimay, qorshayaasha lacag bixinta xiliga gaaban iyo xiliga dheer iyo kartiyaha lacag bixinta madasha onlaynka ah ee bukaanka.

Bukaanada Aan Caymiska Ku Jirin

Nidaamka Caafimaadka Diley Ridge wuxuu sii gaarsiiyaa lacag dhimista dhammaan bukaanada caymiska ku salaysanqaata adeegyada caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah. Tirada lacagaha dhimista aan caymiska ku jirin waa kuwo ku salaysan Xeerarka Heerka Saboolnimada Dowlada dhexe (FPL). Warbixinaha bukaanu waxay muujin doonaan qadarka lacag dhimista iyo hadhaaga lagu leeyahay. Dhammaan adeegyada caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah waxay u qalmaan lacag dhimis aan caymis ku jirin. Nidaamka Caafimaadka Diley Ridge waxaa dhici karta in ay u-qalmaan bukaanada iyada oo lagu salaynayo shuruudo degenaansho.

Adeegyada sida hawlaha isqurxinta, qalabka caawimada maqalka iyo daryeelka indhaha kuwaas oo aan caadi ahaan laguma caymiyo caymiska waxaa qiimo loogu sameeyaa qaab xirmo sicireed ah iyada oo aan lahayn lacag-dhimis dheeri ah. Dhammaan lacag bixinada waxaa la filanayaa waqtiga adeegga.

Qorsheyaasha Lacag bixinta Muddada-Dheer iyo Muddada-Gaaban

Bukaanada aan bixin karin qaar ama dhammaan mas'uuliyadahooda maaliyadeed waxaa dhici karta in ay u qalmaan qorshooyinka lacag-bixinta muddada-dheer ama muddada-gaaban. Qorshaha lacag bixinta muddada-gaaban ee Nidaamka Caafimaadka Diley Ridge waa mid dulsaar-la'aan ah oo hadhaaga bukaankana waa in lagu bixiyo asaga oo buuxa hal sano gudaheeda. Qorsheyaasha lacag-bixinada faa'iidada-ka dhalanaysa ee muddada-dheer waa kuwo la helo iyada oo loo marayo Adeegyada Maaliyadeed ee HealthFirst oo loogu talogalay bukaanada aan ku bixin karin hadhaagooda gudaha hal sano.

Caawimaada Maaliyadeed / Siyaasada Daryeelka Samafalka

Lacag dhimista adeegyada caafimaad ahaan lama huraanka waxaa loo heli karaa dhammaan bukaanka kuwaas oo kasbada 200 boqolkiiba ama wax ka yar Heerka hagitaanada Saboolnimada Federaalkas. Adeegayada la doorto sida qaliin isqurxin ma aha kuwo ku jira barnaamijkeenna samafalka. Dadka aan caymiska ku jirin ee kasbada boqolkiiba inta u dhaxeysa 200 iyo 400 ee xeerarka Heerka Saboolnimada Dowlada-dhexe ah waxay u qalmaan qayb dhimis ah oo u dhiganta sicirka dhimista caawimaada Caafimaadka. Bukaanada u qalma caawimada maaliyadeed lagama qaadi doono kharash ka badan qiimaha lacag dhimista ee Medicare.

Lacag-bixinada la wadaago ee bukaanka iyo ka-jarisyada waxaa dhici karta in ay u qalmaan sicir lacag dhimis ah haddii bukaanku u-qalmo caawimaad maaliyadeed uuna kasbado wax ka yar boqolkiiba 200 ee Xeerarka Heerka Saboolnimada Dowlada ah.

Dhimista sidoo kale waxaa heli kara bukaanada la kulmaya qiimooyinka masiibadu oo xiriir la leh daryeelkooda caafimaadka. Qiimooyinka ba'an waxay dhacaan marka kharashaadka caafimaadka bukaanka ee loogu talogalay fadhi daryeel oo kor u dhaafaya boqolkiiba 20 oo dakhligooda sannadlaha ah. Xaaladahan, lacag-bixinada la wadaago ee bukaanka iyo ka-jarisyada waxay sidoo kale ku jiri karaan dhimista.

Lacag dhimista daryeelka deeqda waa la diidi karaa haddii bukaanku uu uqalmo ilo kale oo maalgelineed sida qorshaha Isku bededelka Caymiska Caafimaad oo waa la diidi ama diiyaar uma aha in loo isticmaalo ilahan.

Si loogu isticmaalo caawimada maaliyadeed, fadlan buuxi oo soo gudbi codsigalaga helayo bartan internatka. Qaab dhammaystiran oo Nidaamka Caafimaadka Diley Ridge Xeerka Caawimada Maaliyadeed waxaa laga heli karaa bartan internetka ama https://www.dileyridgemedicalcenter.com/patient-information/pricing-information.

Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka

La taliyayaasha maaliyadeed waxaa loo heli karaa in ay la shaqeeyaan bukaanka dhammaystirka codsiyada caawimada maaliyadeed si loo go’aamiyo waxay tahay caawimada la heli karaa. Middaan waxaa kamid ah qiimeynta u-qalmidtaanka loogu talogalay caawimaada Caafimaadka iyo qorsheyaasha Isdhaafsiga Caymiska Caafimaadka.

Bukaanku waxa uu la xidhiidhi karaa la taliyaha maaliyadeed xaga cusbitaalka meesha ay daryeel ku leeyihiin kaas oo caawin kara go’aaminta u qalmida caawimada maaliyadeed. La taliyaasha maaliyadeed sidoo kale waxay bixin karaa nuqulo bilaasha ah oo Xeerka Caawimada Maaliyadeed ah, iyo Luqadda Kooban ee Cad. Nuqulada bilaashka ah sidoo kale waxaa lagu heli karaa qoraal loo soo diro MCHS Customer Service Dept, 6150 East Broad St. Columbus, OH 43213, PH# 800-346-1009. Xeerka Caawimada Maaliyada, Codsiga iyo Luqadda Kooban ee Cad waxaa loo turjumaa luqaddaha soo socda. Isbaanish, Soomali, Neebaali, Shiine, Carabi, Faransiis, Mandaariin, Jabaaniis, Ruush, Kuuriyaan, iyoFiitnaamiis. Ma jiro bukaan u-qalma caawimaada maaliyadeed oo laga qaadanayo kharash ka badan tirada guud ahaan uu qaado isbitaalka, kuwaas oo ah sicirada daryeelka Caafimaadka.

Goobta Suuqa Caymiska Caafimaadka

Xeerka Daryeelka la Awoodo (Affordable Care Act, ACA) waxa uu u baahanyahay in qof walba oo sharci ahaan ugu nool Maraykanka uu yeesho caymis caafimaad Janaayo 1, 2014. Sidoo kale malaayiin shakhsi oo haysta wax yar ama aan caymis lahayn, waxay ku helaan qorshayaashaa caafimaad heerar kharash oo kala duwan. Sidoo kale sharciga wuxuu bixinayaa caawimaad maaliyadeed la siiyo dadka u qalma iyada oo ay ku salaysan tahay qiyaasta dadka ku nool qoyska iyo dakhliga. Fadlan la kulan la-taliye maaliyadeed oo jooga xarunta aad ku qaadatid daryeelka hadaad rabto macluumaad badan. Laga bilaabo Oktoobar 1, 2013, waxaad awood u yeelan doontaa in aad wax ka iibsato Goobta suuqa Caymiska Caafimaad ee onlaynka ah, sidoo kale loo yaqaano sidii is dhaafsiga caymiska caafimaad, halkaad hal mar joogsiga wax ka iibsan karto wixii qorshayaal ah ee ku habboon miisaaniyadaadda iyo baahida daboolidaadda. Diiwaangelinta soo socota ee furan ee goobta suuqa is dhaafsiga caymiska caafimaad waa Noofambar 2016.